Finnish Red Cross

# Raadinta xubin qoyska ka tirsan oo luntay

Laanqayrta Cas waxay xubnaha qoyska ee kala lumay ka caawisaa in ay is-helaan islana xiriiraan. Guddiga Laanqayrta ee caalamiga ah (ICRC) waxay isku-dubbariddaa hawlaha baadigoobka ah marka ay dhacaan masiibooyinka dabiiciga ah, iska hor-imaadyo iyo guuritaanka. ICRC waxay sannad kasta samaysaa kumannaan baafinta dadka ah oo cusub.

Ururada caalimiga ah ee Laanqayrta iyo Bisha Cas ee dunida dacalladeeda kala jooga ayaa ka qaybqaata raadinta xubnaha qoyska ee lumay. Laanqayrta Cas ee Finland waa qayb ka mid ah shabakaddan caalamiga ah.

Baafinta dadka waxaa looga baaraandegaa xafiiska dhexe ee Laanta Qayrta Cas ee Finland. Adeeggu waa mid lagu kalsoonaan karo macluumaadyada shakhsiyadeedna waxaa looga baaraandegayaa si ammaan ah. Marka laga baaraandego baafinta dadka ayaa waxaa loo sii dirayaa guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta Cas. Laanqayrta Cas ee Finland waxay marka lagu jiro marxaladaha kala duwan la xiriiraysaa qofka ehelkiisa raadinaya.

## Sida ayaad u samaynaysaa baafinta dadka

1. **Buuxi foomka baafinta dadka.**
   Waxaa foomka laga helayaa cinwaanka punainenristi.fi/hae-apua-ja-tukea/kadonneiden-loytamiseen/henkilotiedustelu-kadonneen-loytamiseksi
   Waxaa foomka buuxin kara ehelka ama mas'uulkiisa/wakiilkiisa.
   Waxaad boggan ka heleysaa tilmaamo iyo foomam ku qoran luqado badan.
2. **Ugu dir foomka oo saxiixan qaab elegtroonig ah cinwaanka** tracing@redcross.fi ama boostada cinwaankeedu yahay PL 168, 00141 Helsinki
3. **Sug xiriirka ay Laanqayrta Cas ee Finland kula soo samaynayso.**

**Macluumaad dheeraad ah**
Kala xiriir ugu horreyn su'aalaha ku saabsan baadigoobka dadka, xafiiska dhexe ee Laanqaryta Cas ee Finland.

lambarka xiriirinta, 020 701 2000 (maalmaha shaqada, saacadda u dhexeysa 8.30–16.00)
tracing@redcross.fi